

**Kanton Schaffhausen**  
**Dienststelle Primar- und Sekundarstufe I**  
Herrenacker 3  
CH-8200 Schaffhausen  
www.sh.ch

T +41 52 632 72 85  
ruth.marxer@ktsh.ch



Ku socoto Waalidka  
Sharafta leh

Schaffhausen, 4. Sibtember 2020

## **Xilliga dayrta iyo xilliga Jiilaalka – si da loo la dhaqmo Durayga "caadiga ah" iyo astaamaha cudurka Koronafayras**

Walidiinta Sharafta leh

Xiliga dayrta iyo jiilaalka ay soo dhowaadaan heerkulkuna hoos u dhaco, hargabka caadiga ah ayaa ku kordha carruurta iyo dadka waaweyn. Waqtiyada gaar ahaan coronavirus, marwalba ma sahlana in lakala saaro hargabka iyo fayraska. Sida laga soo xigtay waaxda caafimaadka, nidaamyada soo socda waa in la raaco:

1. Carruurta iyo Dhalinyarada lagu arko qufac iyo sanko dareera iyo gaar ahaan qandho (Xumada: laga bilaabo 38.3 ° C) waa inay guriga joogaan oo loo oggol yahay inay dib ugu noqdaan dugsiga haddii ay calaamadaha ka xor yihiin ilaa 24 saac.  
Hargab fudud weli looma qiimeyn karo inuu yahay infekshan daran oo neef mareenka ku dhaca. Qodobka ugu muhiimsan ayaa ah in calaamadaha ama astaamaha cudurka ay kasii dareen maalmihii lasoo dhaafay. Waxa ka baxsan cudurkan neefta (Asthma) ama xasaasiyada sida Sanboorka. Tan waa in lala socodsiiyaa Dhaqtarka oo uu cadeeyaa daaweynta.
2. Haddii carruurta ama dhallinyaradu ay sidoo kale muujiyaan astaamo ay ka mid yihiin dhuun xanuun, neef-qabad, qandho iyo murqo xanuun ay la socoto qandho ama urka iyo dhadhanku katagaan, waa inay guriga joogaan. Waalidiintu waxay la xidhiidhayaan dhakhtarka carruurta ama dhakhtarka qoyska ama khadka taleefanka ee Korona si loo go'aamiyo sida loo sii wadayo. Sida laga soo xigtay waaxda caafimaadka, hadda lama sheegin in carruurta ka yar 12 sano loo sameeyo baaritaannada Korona.

Ardayda lagu arko astaamaha cudurka fayraska iskuulka dhexdiisa. Macallinka ayaa guriga u diraya (**Kuma jiraan astaamaha Durayg cadiga ah.**)

(Caruurta fasalka 1aad ila iyo 2aad walidkood ayaa lala hadlaya) markaas waa in si dagdag ah loo soo doono oo guriga la keeno (la iskana ilaaliyo gaadiidka dadweynaha) oo la wargaliyo dhakhtarka carruurta ama dhakhtarka qoyska.

Waxaan ognahay in su'aasha durayga aysan sahlaneyn in laga jawaabo. Sidaa darteed, waxaan si gaar ah ugu tiirsan nahay adiga, Waalidka qaaliga ah . Samee qiimeyn xasaasi ah oo ku saabsan xaaladda caafimaad ee ilmahaaga oo miisaan inay aadi karaan dugsiga iyo in kale.

Iskuuladu waxay ku xidhanyihiin wadashaqeyn aamin ah. Waxayna ka mid noqon doontaa nolol maalmeedka dugsiga ee carruurta hargab fudud qaba. Tani waa inay suurto gal noqotaa ka dib baaritaanka halista ah ee astaamaha aan kor ku soo xusnay iyo iyadoo la raacayo tallaabooyinka nadaafadda.

Khadka tooska ah ee deegaanka 'Corona' ayaa diyaar u ah inuu kaaga jawaabo su'aalahaaga:

Tel. +41 52 632 70 01; Email: corona@sh.ch

Saacadaha shaqada: 8da subaxnimo ilaa 6da galabnimo maalin kasta

Macluumaadka joogtada ah ee la cusbooneysiiday waxaa laga heli karaa:

[Webseite des Gesundheitsamts](#)

[Webseite Coronavirus und Schule](#)

Fadlan raac xeerarkan anshax ah ee ufiican ilmahaaga iyo dugsiga oo dhan. Waxaan kaaga mahadcelineynaa wada shaqeynta waxaana rajeynaynaa adiga iyo qoyskaaga caafimaad wanaagsan.

Waad salaamantihin

Waxbarshada Dugsiga qaybta  
hoose / Dhexe



Ruth Marxer, Masuulka